

Xogta Urur-siyaasadeedka Runta Iyo Caddaaladda oo kooban

Magaca ururku waa **Runta iyo Caddaaladda (RunCad)**, labada erey ee Run iyo Caddaalad ayaana ururka u ah magac iyo mabda'ba, wuxuuna u taagan yahay in ay ummadda Soomaaliyeed hesho nidaam maamul oo runta la wadaaga, garsoorna ugu sameeya si caddaalad ah.

Nooca Ururka Runta iyo Caddaaladu, waa urur siyaasi ah oo aaminsan afkaarta iyo mabaadi'da ku salaysan wada-tashiga, isla markaasna waafaqsan shareecada Islaamka.

Ururka Runta iyo Caddaaladdu waa urur u taagan midnimada iyo wada-jirka ummadda Soomaaliyeed guud ahaan, gaar ahaanna Puntland.

Ururka Runta iyo Caddaaladdu wuxuu aaminsan yahay in ummadda Soomaaliyeed ay ku wada noolaato nabadgelyo, caddaalad iyo garsoor dhab ah.

Ujeedooyinka Ururka Runta Iyo Caddaaladda waxaa saldhig u ah qodobbadan:

1. Xoojinta, isku duubnida iyo isku-xirka dalka iyo dadka Soomaaliyeed.
2. Adkaynta shareecada Islaamka iyo ku dhaqankeeda suubban.
3. Hirgelinta iyo ku dhaqanka nidaamka xisbiyada badan iyo xukunka oo lagula kala wareego hannaan-doorasho oo xor iyo xalaal ah.
4. Dhammaystirka, hirgelinta iyo ku dhaqanka dastuurka fedaraalka ah oo dhowraya shuruucda dalka iyo nidaamka fedaraalka ah.
5. Hirgelinta sinnaan iyo caddaalad buuxda ee bulshada dhexdeeda iyo sharciga hortiisa.
6. Hirgelinta iyo xaqiijinta nidaam dowladeed oo ummaddu u siman tahay hoggaanka iyo metelaadda dalka, iyada oo la eegayo kartida, aqoonta iyo hufnaanta qofka, ee aan la eegin qolo (qabiil) iyo wixii la mid ah.
7. Xaqiijinta baabbi'inta iyo tirtiridda nidaamka sharcidarada ah ee hayb-sooca, kaasoo ka soo horjeeda shareecada Islaamka iyo qawaaniinta dowliga ah.
8. Kor u qaadista dhaqaalaha dalka iyo ka faa'iidaydiga khayraadka ku jira, iyada oo la dhiirrigelinayo maalgelinta gaarka ah iyo suuqa xorta ah.
9. Kor u qaadista arrimaha bulshada sida waxbarashada, caafimaadka, garsoorka, fanka iyo suugaanta, isboortiga iwm.
10. Xoojinta xuquuqda siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsho ee dhallinyarada, dumarka iyo dadka laga tiro badan yahay.

Hal-ku-dhegga Ururku waa: **"KAGA RAYSO RAFAADKA RUN IYO CADDALAD"**